

## Barnaamijyada loo hayo dhalinyarada cusub



[www.mcaf.nb.ca](http://www.mcaf.nb.ca)



### Ururka Dhaqamada Badanee Firidirkton Inc.

**Barnaamijyada** (UDHBF) Dhalinyarada Cusub waxaa loogu talo galey dhalinyarada (13-29). Barnaamijka wuxuu ka hortagaya caqabada ka hor istaagaya dhallinyarada in ay helaan meel nabdoon oo ay waqtii fican ku qaataan, saaxiib ku sameystaan, ayna kula wadaagaan qibradahooda dhalinyarada kale ee cusub, bulshadoodana wax uga bartaan.


#### ■ Barnaamijyada Waxbarasho

**Shaqaalaha Dejinta ee Iskuulada** (SHDI) waxey dhallinyarada cusub iyo qoysaskooda ku xiraan adeegyada, ilaha agabka iyo warbixinta kuwaasoo ardeyda ka caawiya in ay iskuulada guul ka gaaraan.

Shaqaalaha deginta ee **Barnaamijyada ku Hadalka Faransiiska** waxey ka taageeraan dhallinyarada Iyo qoysaskooda raba iney galaan Iskuulada looga hadlo Faransiiska ee ku yaala agagaarka Firidirkton.

**Kooxaha Shaqada Guri** iyo **macalimiinta qaaska ah** waa kuwo ay ka heli karaan ardeydu goobo kala duwan inta lagu guda jiro sanad dugsiyeedka.

**Deeqaha Waxbarasho ee Dhalinyarada Cusub** waxaa ay siiyaan saacidaad dhaqaale dhallinyarada tagta jaamacadaha iyo koolejyada ee Firidirkton. Deeqahani waxey ku yimaadeen tabaruclood iyo dhacdooyinka qaaska ah ee UDHBF.



### ■ Barnaamijyada Xogaaminta iyo Mutadawacnimada

Barnaamijyadan waxey bixiyaan deegaan nabad ah, taageero leh, oo ay waqtii fican ku qaataan dhallinyarada cusub, kula kulmaan dad cusub, sare ugu qaadaan xirfadahooda iyo awoodahooda, koror sadaana aqoonta bulshadooda.

#### ■ Adeegyada Taageerada

**Maamulaha Kiiska Dhalinyarada Cusub** waxey ka taageeraan kuna weheliyaan dhallinyarada in ay helaan barnaamijyada, adeegyada, ilaha warbixinta ee UDHBF Iyo ururada bulshada si ay oga taageeraan safarkooda dejinta. Taageerooyinka dheeraadka waxaa ka mida la talin, sahaminta adeegyada bulshada, iyo sharciyada.

#### ■ Daryeelka isku Xirka Iyo shaqaaleynta

Dhalinyarada waxaa aan ka taageernaa:

- In ay fahamaan Qaabka shaqada Canada iyo dhaqanka
- In ay codsadaan tababaro, waxbarasho dheeri ah, deynya ardeyga, deeqo waxbarasho
- In ay dejistaan yool shaqo oo mustaqbalka ah, ayna bartaan sida loo raadiyo shaqada iyo isku xirka.

### ■ Kooxyaha taageera Gabdhaha iyo Wiilasha

Waxaan u sameynaa dhaqdhaqaq bulsho, kuwo hal abuur, tababaro, iyo fursado samo fal. Barnaamijyadani waxey siyyaan dhallinyarada deegaanka taageero, nabadeed, iyo waqtii fican oo ay kula kulmaan dad cusub, saaxiibo cusubna ku sameystaan. Xubnaha kooxdu waxey sahamiyaan bulshadooda waxeyna horumariyaan xirfadooda hogaminta.

### ■ Barnaamijyada Isboortiska iyo Farshaxanka

Ka qeybgalka barnaamijka Farshaxanka waxey dhallinyarada siisaa fursad ay ku horumariyaan kartidooda farshaxan. Dhallinyaradu waxay ka qeybgali karaan barnaamijyo kala duwan ay bixiyaan bulshada ku dhaqan Firidirkton. Barnaamijyada farshaxanka waxaa ay isugu jiraan: tiyaatarka, gabayo, gitaar iyo organka, ciyaaro iyo sawir qaadis.

### ■ Ka qeybgalka isboortiska Dhalinyarada Cusub

**Cusub** waa barnaamijyo loo sameeyey si uu u siyo aqoon, illo agab iyo warbixeeneed iyo kalsooni ay ugu xirmaan isboortiska deegaanka.

### ■ Barnaamijka Baaskiilada Dhalinyarada Cusub

waxay kala shaqeeyaan dhallinyarada dib u cusbooneysiinta baaskiiladaha loogu deeqay. Waxaa ardeyda lagu dhiiri gelyiyya iney ka qayb qaataan sameynta baaskiilada iyo tababarka amaanka.

## Ururka Dhaqamada Badanee Firidirkton Inc.

28 Saunders Street  
Firidirkton, Niyuu baraaniswiik  
Canada E3B 1N1

Email: [children@mcaf.nb.ca](mailto:children@mcaf.nb.ca)  
Tell (506) 454-8292

Waxaa maalgeliyey:

Immigration, Refugees and Citizenship Canada

Nouveau Brunswick

[www.mcaf.nb.ca](http://www.mcaf.nb.ca)

